Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kalfadhiga 8-aad kulankiisa:14-aad Tr:06.06.2016

Kalfadhiga 8-aad

Kulankiisa:14-aad, sacada furitanka.12:45 gh, sacada xiritanka. 1:35 gd.

Guntinta: 153 xildhibaan

Ajendaha:-

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.U codeynta Mashruuc Sharci wax ka bedalid Dastuur

4.U codeynta Sharciga Xanaanadda Xoolaha

5.Akhrinta 3-aad Sharciga Axsaabta Siyaasadda

6.Akhrinta 3-aad Sharciga Xuquuqul Insaanka

7.Akhrinta 1-aad Heshiiska Dalalka Afrikada Bari loogu dhisayo Ciidamo Gurmad ah.

Shir-Guddoomiye,Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Jeylani Nuur Iikar.

1.waxaa shirka furay Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariinka uu akhriyay Xildhibaan:Maxamad C/lle Geesay

2.Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur,wuxuu xildhibaanada **uu u soo jeediyay in ay ansixiyaan ajendaha, xildhibaanada wey ansixiyan ajendaha.**

3.Guddoomiye ku xigeenka 1aad wuxuu xildhibaanada u soo jeediyay,Mashruuca Sharciga wax ka beddelida Dastuurka kalfadhiga soo socda in aan u codeyno madama sharcigaas loo baahan yahay 184 cod.

4.Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur,wuxuu sheegay in aan hadda u codeynayno Sharciga Xanaanadda Xoolaha.

Codkiina Sidan ayuu u dhacay.

Inta Ogol ---------- 150 xildhibaan

Inta Diidan ---------- 0 xildhibaan

Inta ka Aamustay---------- 3 xildhibaan

Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur Iikar,wuxuu ku dhawaaqay codkii loo qaaday Hindise sharciyeedka Xanaanadda Xoolaha waa ansax.

5.Guddoomiye ku xigeenka 1aad wuxuu sheegay, Akhrinta 3aad sharciga Axsaabta siyaasadda ha inoo akhriyan guddiga arrimaha guddaha iyo amniga.

Xildhibaan:Cabdalla Boss Axmed,wuxuu soo jeediyay,Akhrinta 2aad wuxu maray 16.02 2016 guddiga Arrimaha Gudaha wuxuu xubnaha ku wargeliyay in Akhrinta 3aad in an wax laga badelin oo sidii akhrintii 2aad ku soo celino,qalin horaadka guddiga arrimaha guddaha waxba kama dhimin,waxan laakiin aan ku soo darnay akhrintii 2aad wixii aad na tiraahdan halagu daro,waxaan kulanay bulshada rayidka wan wada tashanay ayagana waxay nayirahdeen waxba kama bedelayno sidiisa haloo gudbiyo, waa inaan ugu baxnaa 4.5, mudanayaal waxan idiinka codsaneyna madaama sharcigaan wax ka baddelin in manta loo codeeyo.

Xildhibaan:Cabdi Axmed Dhuxulow,wuxuu sheegay,waxaa taageeraya Cabdalla Boss,waxaa fadhiya xildhibaano boqol iyo dhowr ah in loo codeyo sharcigan axsaabta wayo waa muhiim.

Xildhibaan:Zeynab Caamir,waxay soo jeedisay,aniga guddiga arrimaha guddaha Ayaan ka tirsanahay marka soo jeedinta ay tahay gabdhaha laguma darayo,waxaan codsanaya in la xadeeyo xisbiyadda tiradooda waxay marayan boqolaal oo ayna noqon wax faraha ka baxay.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yusuf,wuxuu sheegay,wan raacsanahay in loo codeeyo oo dib loo dhigan arrinta Zeynab ka hadashay waa sax waa in la xadaya xisbiyadda oo lagu soo kooba 3xisbi oo kaliya.

Xildhibaan:Maxamed C/laahi fadhaye,wuxuu soo jeediyay, aan u codeyno Hindise sharciyeedka

Guddoomiye ku xigeenka 1aad Mudane:Jeylani Nuur Iikar,wuxuu soo jeediyay,Hindise sharciyeed kan wuxuu soo maray Akhrinta 1,2,3, hadii aan wax laga bedelin waa in loo codeeya waa in la qadariyo axsaabta.

Codkiina Sidan Ayuu u dhacay.

Inta Ogol _____ 149 xildhibaan

Inta Diidan _____ 1 xildhibaan

Inta ka Aamustay_____ 3 xildhibaan

Guddoomiye ku xigeen ka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur Iikar,wuxuu ku dhawaq ay codkii loo qaaday sharciga Axsaabta Siyaasadda waa ansax.

6.Guddoomiye ku xigeenka 1aad Mudane:Jeylani Nuur Iikar,wuxuu soo jeediyay,waxan galeyna

Akhrinta 3aad Sharciga Xuquuqul Insaanka,ku soo dhawow guddiga Xuquuqul Insaanka.

Xildhibaan:Maryan Aweys Jamac,Guddoomiyaha Guddiga Xuquuqul Insaanka,waxay soo jeedisay,waxaa sharaf weyn inoo ah in aan akhrinta 3aad Hindise Sharciyeedka lagu dhisayo guddiga madaxa banaan ee xuquuqul insaanka aan u soo gudbino Guddoonka iyo Xildhibaanada Golaha Shacabka,M.ne Guddoomiye Hindisahan wuxuu soo maray heerar kala duwan.Guddiga Madaxa-banaan ee Xuquuqul Insaanka wuxuu ka mid yahay guddiyada uu Dastuurka ina farayo sameyntiisa sida ku cad Qodobka 111-aad Faqradiisa(B) wuxuuna guddiga u xilsaaran yahay sida.

a. Horumarinta Xushmeynta xuquuqda Aadamiga iyo dhaqanka xuquuqda Aadamiga.
b. Horumarinta ilaalinta,xoojinta iyo adkeeynta xuquuqda Aadamiga
c. Baaritaanka iyo qiimeynta hab dhaqanka xuquuqda aadamiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Xildhibaan:Bishaar Ugaas,Xogha'yaha guddiga xuquuqul insaanka,wuxuu soo jeediyay,sharcigan mudo 2sano ah ayuu horyaalay Baarlamaanka,sharciga lagu dhisayo guddigan madaxa banana wuxuu ka mid yahay waxyabaha uu Dastuurka na farayo sameyntiisa,guddigan wuxuu ka kooban yahay 9 xubnood(5 rag ah, 3 haween ah, iyo hal nafo ah) wuxuu xafiisyo ku yeelan doona dhaman gobolada federaalka oo dhan,sidaa daraadeed waxan codsanaya in la an sixiyo sharcigan.

Xildhibaan:Yuusuf,wuxuu soo jeediyay,waxaan taageeraya in loo codeeyo sharcigan.

Xildhibaan:Maxamed Aamiin,wuxu sheegay,waxan taageeraya in la ansixiyo sharcigan.

Guddoomiye ku xigeenka 1aad Mudane: Jeylani Nuur Iikar,wuxuu soo jeediyay,in loo codeeyo

Hindise Sharciyeedka Guddiga Madaxa banaan ee Xuquuqul insaanka.

Codkiina Sidan ayuu u dhacay.

Inta Ogol _____ 145 xildhibaan

Inta Diidan_____ 3 xildhibaan

Inta Ka Aamustay_____ 5 xildhibaan

Guddoomiye ku xigeenka 1aad Mudane:Jeylani Nuur Iikar,wuxuu ku dhawaaqay codkii loo qaaday Hindise Sharciyeedka Guddiga Madaxa banaan ee xuquuqul insaanka waa ansax.

Xildhibaan:Cabdi Axmed dhuxulow,wuxuu soo jeediyay,madama la ansixiyay guddiga madaxa banaan ee xuquuqul insaanka,waa in la dhisaa guddiga adeega garsoorka kulamada soo socda mida kale mashruuca sharci wax ka bedelid Dastuurka aan u codeyno.

Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka wuxuu soo jeediyay,in la galayo Akhrinta 1aad Heshiiska Dalalka Afrikada Bari loogu dhisayo Ciidamo Gurmad ah,waxa lagu so dhaweyay Wasiirka Wasaaradda Gaashan Dhiga.

Wasiirka Wasaaradda Gaashandhiga S/Gaas Cabdiqaadir Sheekh Cali Diini,wuxuu soo jeediyay,wuxuu Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ka hor Akhriyay,Akhrinta 1aad Heshiiska Dalalka Afrikada Bari loogu dhisayo Ciidamo Gurmad ah, sida aad la socotaan dalalka Bariga Afrika waxay ku heshiiyeen iney dhistaan ciidmo gurmad ah oo iyaga ka dhexeeya(EASF) ciidamadaas oo hadaba meeshii dhibaato laga soo sheego u gurmanaya,kuwaas oo hadafkooda koowad uu yahay iney xili ku haboon qaadan tallaabooyin lagu xaqiijinayo ammniga,nabadda iyo xasiloonida Gobolka.

Hadaba ciidamadaas gurmadka ahi waxay u baahan yihiin maamul iyo sharciyad ay ku shaqeeyan sidaas darted dalalka Gobolku waxay qoteen Heshiiskii Ciidamadaas lagu maamuli lahaa oo dhammeystiran,heshiiskaasi wuxuu si rasmi ah u dhaqan galayaa markii dalalka xubnaha ka ah hay'adda EASF ay intooda badani si gooni-gooni ah usoo ansixiyan Soomaalidana kol haddeey ka mid tahay dalalkii Heshiiskan saxiixay,waxa laga sugaya inay dhankooda ka soo ansixiyaan iyagoo waliba ka mid ah dalalka colaaduhu ka jiraan oo gurmadka u baahan.

Sidaas awgeed, mudanayaal iyo marwooyin,waxaan halkaan idiinku soo gudbinayaa heshiiskii dalalka Afrikada Bari ay gaareen ee lagu saleyn lahaa dhismaha iyo maamulka ciidamada gurmadka ah ee Gobolka, waxaanan si sharaf leh idiinkaga codsanayaa in aad akhrisaan,ka

baaran degtaan dabadeedna aad ansixisaan, waad mahadsan tihiin mudanayaal iyo marwoyin.

Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur,wuxuu soo jeediyay, sharcigaan ha qaateen guddiga difaaca eeBaarlamaanka ha soo akhriyan maalinta arbacada warbixin ha nooga soo diyaariyeen.

Kalfadhiga 8aad Kulankiisa:14aad, uu shir Guddoominayay,Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur Iikar,uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markay ahayd 1:35 gd.